# Calaamadaha Neefsashada walxo

## La socoshada Calaamadaha in Cunto, Dareere, ama Handhuuf Gali Karto Hawo-mareenka Cunugaaga (Neefsasho Walxo)

Marmarka qaar cunto, cabitaan ama candhuufta waxay marin qaldan ugu dhici kartaa marinka neefmareenka ee ilmaha halkii ay ka mari lahayd calooshooda. Tan waxaa loogu yeeraa **neefsasho walxo**. Way adkaan kartaa in la ogaado, marka waa kuwan qaar ka mid ah calaamadaha lagu garto, *khaas ahaan* inta lagu jiro ama ka dib markuu ilmahaagu wax cuno ama cabbo, ha ahaado afka ama tuubada quudinta.

### Calaamado Cad Cad (Muuqda)

Kuwani way ka sahlan yihiin in la garto waxayna dhici karaan inta lagu jiro ama ugu islamarkiiba kadib cuntada ama cabitaanka:

- Qufac ama saxasho
- Dhuun-qabatiin
- Diiditaanka in wax la siiyo
- Dhawaq-qoyan ama cod go'go'o
- Cod adag ama jajaban
- Soo-fardhin ama soo-daadin handhuuf
- Apneas (neefsashada oo joogsata)
- Desaturations (hoos-u-dhac dheega oksijiintu ku badantahay) la timaada quudinta
- Neefsasho sawahan leh ama neefsasho oo aad mooddo inuu ka adagyahay sidii hore
- Xasillooni darro jireed (tusaale ahaan, isbeddelka garaaca wadnaha, dhiig karka, ama heerkulka)

### Calaamadaha ugu Dhaciifsan

Calaamadahan ayaa laga yaabaa inay yihiin kuwo aan iska cadayn laakiin wali waxey ka dhignaan kartaa in laga yaabo in ilmahaagu uu dhib qabo:

- Indhaha oo biyo leh inta ay ku jiraan ama kadib quudinta ama marka ay laqayaan candhuuf
- Isbedel mawjad oo kedis ah, sida noqoshada kala harharid ama qallafsan si lama filaan ah
- Isbeddelka degdeg ah ee xaalada, sida isbeddelada jawiga, awooda, ama xaalad maskaxeed
- Baahida joogtada ah ee ogsijiin dheeraad ah ama oksijiin kordhay inta lagu jiro ama ka dib quudinta
- Infekshano joogtada ah ee neef-mareenka sida hargabyada, sanbuurka (hargabka), iyo oofwareen
- Miisaan korodhka oo liita
- Quudinta waxay qaadataa waqti dheer, ama wax aad u yar ayaa la cunaa
- Si fudud u daalaa iyagoo la quudinaya
- Sanka oo ballaarta xilliga quudinta
- Isbedel midab (sida u ekaansho khafiif ah ama baluug) inta lagu jiro ama ka dib quudinta

### Maxaa la sameeyaa haddii aad aragto calaamado muujinaya neefsasho cunto.

Neefsashada cuntada waxay dhici kartaa iyadoon laheyn wax calaamado muuqda. Haddii aad isku aragto wax ka mid ah calaamadaha kor ku xusan—ama haddii aadan hubin—la hadal bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga. Mar walba waa caadi in su'aalo la isweydiiyo ama la weydiiyo qiimeyn. Adigaa ugu yaqaana cunugaaga.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah ama walaac ah, kala xiriir khadka Kalkaalisada Gillette Telehealth 651-229-3890.